

TILMAAMAHA WAALIDKA EE BEDELKA COLORADO (CoALT) QIIMEYNTA SAAYNISKA IYO CILMIGA BULSHADA



Qiimeynta waxay siisaa warbixin qiimo leh ardayda, waaladiinta iyo macalimiinta hadii ardayda ay garanayaan heerka fasalka iyo oo ay ku socdaan wado toosan oo qalin jabin diyaar u ah qarniga 21aad. Natiijooyinka qiimeynadaan waxaa loogu talagalay in ay bixiso hal qiyaas ee cadeynta jirka ee hormarka waxbarashada canugaada.



WAA MAXAY QIIMEYNTA SAAYNISKA IYO CILMIGA BULSHADA CoALT

Qiimeynta Saayniska iyo Cilmiga Bulshada CoAlt waa heerar ku saleysan iyo qiyaasta hormarka ardayga ee dhinaca Natiijooyinka Cadeynta Kordhinta Heerarka Waxbarashada Colorado. Tani waa qiimeynta gobolka u sharciyeeyay ardayda qaba curyaanimada garashada muhiimka ah kaas oo aan awoodin in uu ka qeybqaato CMAS, xitaa iyada oo leh qaabilaado. Qiimeynta Saayniska CoAlt waxaa lagu maamulaa ardayda fasalada 5 iyo 8. Qiimeynta Cilmiga Bulshada CoAlt waxaa lagu maamulaa ardayda fasalada 4 iyo 7 ilaa 1/3 ee dhammaan ardayda oo dhan ee fasaladaas.



GOORMEE AYAA CANUGEYGA LA INTIXAAMAY?

Canugaaga waxaa la imtixaamayaa inta lagu jiro bisha Abriil. Daaqada maamulka imtixaanka waa Abriil 11, 2016 – Abriil 29, 2016. Canugaada waxaa la imtixaamayaa kaliya maalmaha qaarkood sida ku saleysan fasalka iyo maadada, ma ahan xiliga lagu gudo jiro daaqada oo dhan. Fadlan la xariir macalinka cunugaaga ee jadwalkooda gaarka ah ee imtixaanka.



Abriil						
AX	IS	TA	AR	QM	JI	SA
					1	2
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30



BUUNDOOYINKEE AYUU CANUGEYGA HELAYAA?

Canugaaga wuxuu helayaa baaxada buundada iyo heerka waxqabadka. Heerarka waxqabadka waxay tilmaamaan fikradaha iyo xirfadaha ardayda laga filanayo in ay muujiyaan mid walboo heerar ah. Gudbitaanka afarta fasal iyo heerka aaga waxqabadka tasmada waa Waayo aragnimo la'aan, Hormar, Degdega iyo Sahminta.

Baaxada buundada guud ee canugaaga (tirada u dhaxeeyso 0 iyo 250) iyo heerka waxqabadka (Sahminta, Degdega, Hormarka ama Waayo aragnimo la'aanta) waxaa la siiyay. Wixii meeleyn aan dhameystirneen waxaa la siiyay ardayda oo aan ka jawaabin qaar kamid ah sheeyada qiimeynta.



SIDEE BUUNDOOYINKAAN LOO ISTICMAALAYAA?

Ujeedada koowaad ee barnaamijka qiimeynta waa go'aansashada heerka ardayda Colorado ee qaba curyaannimada garashada muhiimka ah waxay buuxisaa Natiijooyinka Cadeynta Dheeraadka ah ee Heerarka Waxbarashada Colorado ee aagaga tasmada Saayniska iyo Cilmiga Bulshada dhammaadka heerka fasalka la tijaabiyay. Natiijooyinka CoAlt waxaa loogu talagalay in ay bixiso hal qiyaas ee hormarka waxbarashada ardayga ee la xiriiro Natiijooyinka Cadeynta Dheeraadka ah.



WARBIXIN DHEERAAD AH

Wixii warbixin dheeraad ah ee qiimeynada, fadlan booqo websaydka La xisaabtanka, Cilmi baarista iyo Dabagalka: <http://testing.dpsk12.org>

Waxaan kuugu dhiiro gelineynaa in aad ka mid naqotid waxbarashada canugaada. Fadlan haka cabsan in aad u gaartid macalinka canugaaga wadooyin aad ku caawin kartid canugaaga guriga iyo sida loo heli karo meeleynada imtixaanka.

Waxaan sidoo kale kugu dhiirogelinayaa in aad booqatid <http://standards.dpsk12.org/standards-resources/> si aad u heshid warbixin caawin leh, oo ay ku jiraan:

- Tilmaamaha Waalidka oo Cilmiga-farsamada
- Illaha gobalka Colorado
- Warbixinta ardayda Ingiriiska

Haddii aad qabtid su'aalo ama walaacyo ku saabsan qiimeynada, fadlan ula xiriir dugsiga canugaaga si toos ah ama ka soo wac Adeegyada u Diyaar garowga Qoyska (720) 423-3054.